

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 18 ee 1da Maarso 1988, Heshiiska Ilaalinta Maamulka, Horumarinta Beyadda Badda iyo Xeebeed ee Gobolka Bariga Afrika iyo labada Protocol ee la xiriira.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU TIXGELIYEEY: Inay tahay lagama maarmaan in laga dhowro Bey'adda Badda wasakheynta lana daryeelo nafleyda badda ku nool iyo xoolaha xeebta ku dhaqan;

MARKUU KU QANCAY: In sida ugu wanaagsan ee ula jeeddadan laga gaari karaa tahay in la meelmarayo Heshiiskan ka dhexeeya dalalka ku yaalla Gobolka Bariga Afrika oo iska kaashanaya arrimaha wasakhaynta Bey'adda Badda siiba markii arrin degdeg ahi tijaado;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

MEELMARIN HESHIIS

Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxay meelmarinaysaa Heshiiska Ilaalinta, Maamulka iyo Horumarinta Bey'adda Badda iyo Xeebaha ee Gobolka Bariga Afrika iyo Labada Protocol ee la xiriira laguna saxeexay Magaalada Nairobi 21.6.1985.

Qod. 2aad

AWOOD SIIN

Wasiirka Kalluumaysiga iyo Gaadiidka Badda wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer Hoosaad ulajeeddadii uu tahay in si habboon loogu fujiyo arrimaha Heshiiska iyo Protocolada ka hadlayaan.

Qod. 3aad

DHAQANGAL

Xeerkanj wuxuu dhaqan gejayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho, 1 Maarso 1988.

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)